WAXA AY TAHAY INAAD KA OGAATID QAABKA IPRC

(waxaa dib loo eegay Agoosto 2006)

Qaabka Guddiga, Aqoonsiga, Meeleynta, iyo Dib u Eegidda (IPRC), ee ku saleysan waxa looga baahan yahay ee lagu dejiyey Xeerka Ontario 181/98 ee *Sharciga Waxbarashada*, waa habka ilmahaagu uu u noqdo mid awood loogu siiyey "barnaamijyada waxbarashada gaarka ah" iyo "adeegyada waxbarasheed ee gaarka ah." Khibraddu waxaa laga yaabaa iney xoogaa mid ku cabsi gelineysa tahay, sidaas darteed ujeeddada qormadaan waa in la sharraxo qaabka lana tilmaamo xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga.

Qeexidda

- Dukumentigaan, ereyga "waalid" waxaa loola jeedaa waalidiinta, mas'uuliyiinta, daryeel bixiyeyaasha ardayda ka yar 16 sanadood, ama ardayda 16 sano jirka ah ama ka weyn.
- Waxa loola jeedo "maalmaha" macnahoodu waa maalmaha iskuulka ee maahan maalmaha jadwalka taariikhda.
- *Sharciga Waxbarashadu* wuxuu "arday gaar ah" ku qeexayaa sidii mid "akhlaaqdiisu, xiriirintiisu, garaadkiisu, jidhkiisu ama gaar ahaanshiyo badan ay yihiin midda isaga ama ayada loogu tixgeliyey iney u baahan yihiin in uu guddigu ku meeleeyo barnaamij waxbarasho oo gaar ah."
- "Barnaamij waxbarasho oo gaar ah" waxaa lagu qeexaa marka laga eego *Sharciga Waxbarasheed* sidii barnaamij waxbarasho oo ku saleysan waxna looga beddelay natiijooyinka qiimeyn socota waxaana ku jira Qorshe Waxbarasho oo Keli ahaaneed (IEP).
- *Sharci Waxbarasho* wuxuu "adeegyada waxbarashada gaarka ah" ku qeexayaa tas-hiilaadka iyo ilaha, marka lagu daro taageero shaqaale iyo qalab, oo lagama maarmaan u ah horumarinta iyo meel marinta barnaamijka waxbarashada gaarka ah, waxaana ku jira IEP.

Waa maxay IPRC?

- IPRC waxay ka kooban tahay saddex qof, kaasoo ay tahay inuu midkood noqdo maamulaha iskuulku ama sarkaalka dusha ka ilaalinta Guddoonku. Dadka kale ee imaanaya waxaa ku jiri kara macallinka fasalka, Ilaha tas-hiilaadka ama Macallinka Taageerada Waxbarashada (LST), khabiir cilmi nafsi, Kalkaaliye Waxbarasho, iwm.
- IPRC waa *sida keliya* ee arday loogu aqoonsan karo inuu yahay "mid gaar ah" uuna u noqdo mid awood loo siiyey "barnaamijyada waxbarasheed ee gaarka ah" iyo "adeegyada waxbarasheed ee gaarka ah." Waxaa laga yaabaa inuu ilmahaagu weli sii awoodo inuu qaato caawino dib habeyn oo loo marayo iskuulka haddii asaga ama ayada ay weli dhibaato haysato, laakiin IPRC ayaa ah habka rasmiga ah ee ardayda "sharci ahaanta awoodda u siinaya" barnaamijyada waxbarasheed ee gaarka ah iyo adeegyada.
- IPRC waa, markaas, qaabka ugu muhiimsan ee billowga ah ee socda ee waalidiinta iyo/ama ardaydu ay wajahaan.
- Qaabka IPRC wuxuu ku lug leeyahay iskaashi u dhexeeya iskuulka iyo waalidiinta si loo xaqiijiyo in ardaygu uu helo taageerada iyo ilaha lagama maarmaanka u ah guusha iyo in ay uu gaaro kartidiisa ama kartideeda buuxda.
- Wadahadallada IPRC waxaa dib loo eegaa ugu yaraan sanadkiiba mar, marka uu waalidka ama iskuulku codsado.

Kulanka IPRC

Kulanka IPRC naftiisu wuxuu badanaa u dhacayaa sida soo socota:

- Maamuluhu wuxuu hagi doonaa gaarsiinta warka;
- Waxaa jiri doona wadahadal laga yeesho sida ilmuhu uu yahay, waxa asaga ama ayadu ay ku wanaagsan yihiin ama dhibaato ku qabaan;
- Natiijooyinka qiimeynta dib ayaa loo eegi doonaa;
- Dardaarammada waxaa laga sameyn doonaa waxa laga yaabo in la sameeyo si ilmaha loo kaalmeeyo;
- Waalidiintu waxay la imaan karaan taxanahoooda u gaarka ah ee waxa ay jeclaan lahaayeen iney arkaan; iyo
- Ka qayb galeyaashu waxay ka wada hadli doonaan kala doorashooyinka meeleynta suuragalka ah si ay taageero u helaan.

Xuquuqaha Waalidka

- Waalidiinta waa in la siiyaa 10 maalmood ogeysiis qoraal ah ee waqtiga iyo goobta dhabta ah ee wixii kulan IPRC ah ee la xiriira ilmahooda. Waqtiga kulanku waa inuu ahaadaa mid munaasab u ah adiga iyo iskuulka labadiinnaba. Waxaad soo jeedin kartaa waqti ka duwan, haddii ay lagama maarmaan tahay.
- Waalidiinta waxaa awood loo siiyey iney joogaan kana qayb qaataan wada tashiyada IPRC ee ku saabsan ilmaha oo dhan waana iney sameeyaan isku day kasta oo ay ku imaanayaan kulammada IPRC.

- Waalid wuxuu xuquuq u leeyahay inuu helo wakiil u jooga kulanka IPRC. Wakiilkaas wuxuu u imaan karaa inuu taageero waalidka ama inuu u hadlo isagoo waalidka wakiil ka ah. (Eeg taxanaha ilaha ee ku qoran dhammaadka dukumentigaan ee loogu talogalay siyaabaha awood loogu yeelan karo ururrada laga yaabo iney bixiyaan qareen.)
- Waalidka waa in la siiyaa wixii war ah ee Madaxa IPRC uu helo oo la xiriira ilmaha, sida qiimeynta, sida ugu dhakhsaha badan ee loo helo.
- Wixii wa ah ee uu waalidku soo gudbiyo, sida baaritaanka takhtarka ama qiimeynta ay sameeyeen aqoonyahannada kale, Guddiga jooga kulanka IPRC waa in uu Guddigu tixgelin siiyaa.
- Qaybaha oo dhan waa iney wadaagaan warka la xiriira kulanka ka hor, meeshii ay suuragal ka tahay.

Waxyaabaha ka soo baxa

- Marka uu Guddigu go'aanka gaaro ka dib, Guddoomiyuhu waa inuu bayaan qoraal ah go'aanka u diraa waalidka. Haddii qof kasta uu oggolaado, bayaanka go'aanka waxaa badanaa lagu qaabeeyaa kulanka IPRC nuqulna la siiyaa waalidka. Bayaanka go'aanka waa iney ku jiraan:
  (a) In Guddigu uu ardayga u aqoonsaday sidii mid gaar ah iyo in kale;
  (b) Meesha uu Guddigu ardayga uga aqoonsaday sidii mid gaar ah, go'aanka waa iney ku jiraan:
    (i) Sharraxaadda Guddiga ee meelaha ardaygu uu ku xooggan iyo meelaha ay baahidu ka jirto;
    (ii) Ku saleynta iyo qeexidda gaar ahaanta la aqoonsaday;
    (iii) Go'aanka meeleynta Guddiga; iyo
    (iv) Dardaarammada Guddiga, haddiiba ay jiraan, ee la xiriira barnaamijyada iyo adeegyada waxbarasheed ee gaarka ah.
- Shay kasta oo muhiim ah ee go'aanka IPRC ayaa ah aqoonsiga habboon ee baahiyaha waxbarashada ilmaha. Bayaanka Baahiyaha ee ku qoran dukumentiga IPRC waa inuu si sax ah uga turjumaa meelaha looga baahan yahay taageerada waxbarashada gaarka ah. Ma jirto xudduud loo sameeyey tirada baahiyaha laga yaabo iney ku jiraan dukumentiga IPRC.

Khilaafka

- Haddii waalid uusan oggolaan go'aanka, ama uusan hubin, waalidku waa inuusan saxiixin bayaanka go'aanka kulanka IPRC. Waalidku waxaa laga yaabaa,m isagoo ogeysiis qoraal ah u soo gudbinaya Guddoomiyaha IPRC, codsanayaa kulan kale oo uu la yeesho Guddiga. Codsigaas waa in Guddoomiyaha Guddiga lagu siiyaa muddo 15 maalmood gudahooda ah ee marka uu waalidku helo go'aanka IPRC. Waalidku waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu si deg deg ah rafcaan uga qaato go'aanka.
- Kulanka labaad ka dib, Guddoomiyaha Guddigu waa inuu waalidiinta ku wargeliyaa sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah iyadoo qoraal in isbeddel lagu sameeyey go'aanka IPRC iyo in kale. Haddii uu jiray isbeddel, warqadda waa inuu ku jiraa bayaan dib loo eegay oo la socda sababaha isbeddelka oo qoraal ah.
- Haddii waalid uusan weli oggolaannin go'aanka IPRC oo dabasocda kulanka labaad, waalidku wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato go'aanka.
- Waalidku waa inuu rafcaanka Xoghayaha Guddoonka Iskuulka ugu soo gudbiyaa muddo 30 maalmood gudahooda ah ee taariikhdii asalka ahayd ee go'aanka IPRC, ama haddii kulan dabasocda la qabtay, muddo 15 maalmood gudahooda ah ee marka waalidku uu helo ogeysiiska Guddoomiyaha Guddiga ee ah in isbeddel lagu sameeyey go'aanka IPRC iyo in kale ama inaan wax isbeddel ah la sameynin.
- Ogeysiis rafcaan waa inuu sheegaa go'aammada uu waalidku ku khilaafsan yahay uuna sharraxaa nooca khilaafka.

Guddoonku ma meel marin karo go'aan meeleyn oo ay gaartay IPRC ilaa waalidku uu oggolaado ama waqtiga gudbinta rafcaanka (30 maalmood) ee go'aanka IPRC uu dhaco.

Ilaha warka:

War dheeraad ah oo ku saabsan qaabka rafcaanka IPRC iyo IPRC waxaa laga heli karaa iyadoo nuqulka *Tusiyaha Waxbarashada Gaarka ah/Adeegyada Ardayda* ee Waalidiinta laga codsanayo maamulaha ama iyadoo la booqanayo shabakadda internetka soo socota: Guddoonka Iskuulka Magaalada Ottawa-Carleton – www.ocdsb.ca (Guji Waxbarashada Gaarka ah.)

Waxaa laga yaabaa inaad la tashato "Guddiga Aqoonsiga, Meeleynta, iyo Dib u Eegidda: Tusiye loogu talogalay OCDSB Shaqaalaha iyo Waalidiinta" ee ku qoran shabakadda internetka OCDSB: www.ocdsb.ca

Waxaad sidoo kale tixraaci kartaa dukumentiga Wasaaradda Waxbarashada ee cinwaankiisu yahay *Waxbarashada Gaarka ah: Tusiye loogu talogalay Mutacallimiinta* oo laga helayo khadka internetka shidan ee: www.edu.gov.on.ca/eng/elemsec/speced/guide.html

Taxanaha Bayaanka Baahiyaha waxaa laga helayaa shabakadda internetka OCDSB: www.ocdsb.ca (Guji Waxbarashada Gaarka ah.)

Taxanaha ururrada caawiya waalidiinta waxaa laga helayaa dhinaca danbe ee *Tusiyaha Waxbarashada Gaarka ah /Adeegyada Ardayda* ee waalidiinta ama shabakadda internetka OCDSB.

Waxaad sidoo kale war dheeraad ah ka heli kartaa adigoo la xiriiraya Guddiga Talobixinta Waxbarashada Gaarka ah ee laga helo Guddoonka Iskuulka Magaalada Ottawa-Carleton ee (613) 721-1820. Magacyada xubnaha SEAC waxaa sidoo kale laga helayaa shabakadda internetka OCDSB.

www.OttawaSpecialEducation.ca

This pamphlet was produced by the Special Education Committee of the Ottawa-Carleton Assembly of School Councils with the support of the Ontario Ministry of Education and the Ottawa-Carleton District School Board.